

# Bixinta Badeecooyinka Cuntada Barnaamijyada Nafaqada Dugsiyada



## *Fahamka Suuqa Nafaqada Dugsiyada<sup>1</sup>*

Barnaamijyada nafaqada dugsiyada waxay ka mid yihiin suuqyada adeegga cuntada ugu weyn uguna deggan ee Mareykanka, oo ay taageerayaan maalgelin joogto ah oo federaal iyo gobol ah. Hase yeeshee, si alaab-qeybiye ugu guuleysto kanaalkan, waa inuu fahmo xaddidaadaha dhaqaale, sharci iyo hawlgal ee gaarka ah ee barnaamijyadan ay la kulmaan. Sanad dugsiyeedka 2024-25, Waaxda Beeraha ee Mareykanka (USDA) lacag celinta cuntada midkiiba waxay u dhaxaysaa \$2.37 quraacda ilaa \$4.43 qadada, iyadoo xaddidaad adag lagu saleynayo heerka dakhliga ardayda. Maadaama qiyaastii 44% lacag celintaas loo qoondeeyay kharashka cuntada qadada midkiiba €, qiimaha badeecadda waa inuu la jaanqaadaa xaddidaadyadan dhaqaale ee adag iyadoo weli

la buuxinayo dhammaan shuruudaha nafaqada Inkasta oo ay jiraan caqabado, iibiyayaasha buuxiya baahiyaha barnaamijyada nafaqada dugsiyada waxay heli doonaan suuq ballaaran oo leh saldhig macaamiil lagu kalsoon yahay iyo iibsade leh doorasho yar waqtiga iibka.

## *Shuruudaha Xisaabinta iyo Cuntada<sup>1</sup>*

Sameynta cunto lacag celin leh waxay ku lug leedahay buuxinta shuruudo nafaqo oo ku saleysan da'da ardayga iyo waqtiga cuntada sida ay qeexday USDA.<sup>2</sup> Si fudud, xisaabintu waxay u sheegtaa agaasimaha nafaqada dugsiyada inta badeeco cunto ah ay ka qayb qaadanayso qaybaha loo baahan yahay ee cunto hoos yimaada barnaamijyada Qadada ama Quraacda Qaranka. Kooxaha cuntada ee leh shuruudaha xisaabinta

waxaa ka mid ah borotiinka, badarka oo dhan, miraha iyo khudaarta, iyo caanaha, waxaana lagu saleynayaa Hagaha Iibsiga Cuntada iyadoo loo eegayo tirada adeegyada halkii unug iibsasho. Tusaale ahaan, hal ounce oo subagga looska ah waxaa loo fixgeliyaa inuu la mid yahay hal ounce hilib/hilib beddel, laakiin laba ounce oo Jiiska Cottage ah ayaa loo baahan yahay si loo helo hal ounce oo la mid ah hilib/hilib beddel.

Go'aaminta xisaabinta badeecad cunto waxaa badanaa lagu sameeyaa iyadoo la barbardhigo badeecadda suurtagalka ah Hagaha Iibsiga Cuntada ee USDA.<sup>3</sup> Alaabada adag, gaar ahaan kuwa loo xisaabiyo borotiin ama badar, Bayaanka Qaaciddada Badeecadda (PFS) waa fixraaca la doorbido ee barnaamijyada nafaqada dugsiyada.<sup>4</sup> Dukumintigani wuxuu taxayaa maaddooyinka ka qayb qaata xisaabinta la xiriirta, qiimaha sida uu qeexayo Hagaha Iibsiga Cuntada, iyo sida badeecadda ugu dambaysa u buuxiso shuruudaha xisaabinta. Badeecooyinka guuleysta ee nafaqada dugsiyada waxay buuxiyaan shuruudaha dugsiyada ee qiimaha, xisaabinta, iyo aqbalaadda ardayda. Marka laga soo tago xisaabinta, cuntada dugsiyada waa inay sidoo kale la jaanqaadaan isbeddellada caafimaadka iyo macaamiisha (mararka qaarkood kuwa gaarka ah ee degmooyinka), sida heerarka badarka oo dhan, sonkor ama sodium la dhimay, iyo baahida sii kordheysa ee borotiinka dhirta ku saleysan ama aan antibiyootiko lahayn.

## *Galidda Suuqa<sup>1</sup>*

Waxaa jira dhowr siyaabood oo lagu heli karo fursad barnaamijka qadada dugsiyada. Dhisidda xiriirto lala yeesho qaybiyayaasha diiradda saaraya dugsiyada kuwaas oo qiimeyn kara suurtagalnimada badeecaddaada oo aqoonsan kara barnaamijyada xiisaynaya waxay badbaadin kartaa waqti waxayna kordhin kartaa fursadaha guusha ee iibiyaha suurtagalka ah. Intaa waxaa dheer,

libiyaha suurtagalka ah waa inuu raadiyaa fursado uu kaga qayb qaato dhacdo deegaanka ah oo ay qabato Ururka Nafaqada Dugsiyada (School Nutrition Association, SNA) ama bandhig cunto (ku dhowaad gobol kasta wuxuu leeyahay hal ama in ka badan sanadkii).

Soo saarayaashu waa inay diyaar u ahaadaan baahiyaha hawlgalka iyo dib u dhacyada ku jira nidaamka dugsiyada dadweynaha, sidoo kale waa inay fahmaan inay ku dhex socdaan habka iibsiga dadweynaha ee la qeexay oo leh waqtiyo cayiman, habraacyo, iyo shuruudo u hoggaansanaan sanad dugsiyeedka hadda si loogu diyaariyo sannad dugsiyeedka xiga.

## *Diyaarinta Macluumaadka Badeecadda ee Dugsiyada*

AURI waxay ka caawin kartaa diyaarinta Bayaanka Qaaciddada Badeecadda ee gaarka ah, guddiyaasha xogta nafaqada, iyo macluumaad kale oo loogu baahan yahay dugsiyada. Si loo diyaariyo, ganacsi wuxuu u baahan doonaa:

- Macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan maaddooyinka iyo hababka
- Qaacido ku saleysan miisaanka
- Cabbirka adeegga badeecadda

Waxaa sidoo kale lagula talinayaa in la diyaariyo macluumaadka badeecadda ee khuseeya hal bog oo warqad iib ah oo lagu dari karo Bayaanka Qaaciddada Badeecadda. Faahfaahinta warqadda iibka waa inay ka mid noqdaan:

- Nooca badeecadda
- Koodhka UPC
- Cabbirka (Cabbirka Adeegga)
- Adeegyo/Kiis
- Cimriga Is-kafaalaha
- Xogta Nafaqada
- Macluumaadka Maaddooyinka iyo Xasaasiyadda
- Soo koobidda xisaabinta

Si aad u bilowdo sameynta Bayaannada Qaaciddada Badeecadda ee waafaqsan cuntadaada, iska diiwaangeli la-talin [auri.org/focus-areas/food/how-auri-can-help/](http://auri.org/focus-areas/food/how-auri-can-help/).

---

## Tixraacyada

1. Faallo ka timid Adeegyada Cuntada iyo Fayoqabka Dugsiyada Dadweynaha Minneapolis (Aaron Krulc), Meey 22, 2024
2. Hagaha Qaabka Cuntada Dugsiga USDA/Xeerarka Xisaabinta: [www.fns.usda.gov/nslp/national-school-lunch-program-meal-pattern-chart](http://www.fns.usda.gov/nslp/national-school-lunch-program-meal-pattern-chart)
3. Hagaha Iibsiga Cuntada USDA: [foodbuyingguide.fns.usda.gov/](http://foodbuyingguide.fns.usda.gov/)
4. Kheyraadka USDA ee Soo-saareyaasha Cuntada/Warshadaha: [www.fns.usda.gov/cn/labeling/food-manufacturersindustry](http://www.fns.usda.gov/cn/labeling/food-manufacturersindustry)
5. U Beddelidda Cunto Karinta Badeecaddaada Qaacido: [auri.org/guides/food-team-one-point-lessons/](http://auri.org/guides/food-team-one-point-lessons/)
6. Ururka Nafaqada Dugsiyada, Tirakoobka Cuntada Dugsiga: [schoolnutrition.org/about-school-meals/school-meal-statistics/](http://schoolnutrition.org/about-school-meals/school-meal-statistics/)



---

Maalgelinta tarjumaadda qoraalkan waxaa suurtageliyay heshiiska iskaashiga ee Resilient Food Systems Infrastructure ee ka socda Adeegga Suuq-geynta Beeraha (Agricultural Marketing Service) ee Waaxda Beeraha ee Maraykanka (USDA). Nuxurka ku jira waxa si buuxda mas'uuliyaddiisa u leh qorayaasha, mana matalayaan aragtida rasmiga ah ee USDA.